WARQAD MACLUUMAAD EE KU SAABSAN HAB-RAACA DEGDEGGA AH

SOMALO - SOOMAALI

Codsigaaga magangalyada caalamiga ah waxaa lagu eegi doonaa hab-raac **"degdeg ah"**. Taas macnaheedu waxa weeye in codsigaaga lagu eegi doono sida ugu dhakhsaha badan, go'aankana lagu soo saari doono muddo saddex bilood gudahood ah laga bilaabo maalinta si rasmi ah loo gudbiyo.

Codsigaaga waxaa hab-raaca degdegga ah loogu eegayaa sababtoo ah wuxuu ku hoos jiraa mid ka mid ah xaaladahan soo socda:

- Markii aad codsiga si rasmi ah u gudbisay, waxaad soo qaadday arrimo aan wax xiriir ah la lahayn shuruudaha lagu helo magangalyada caalamiga ah;
- Waxaad bixisay xog ama hadallo si cad isku khilaafsan, aan isku socon, been cad ah, ama gabi ahaanba aan caqliga geli karin, ama si muuqata uga horimaanaya macluumaadka dhabta ah ee laga hayo dalkaaga asalka ah;
- In kasta oo aad awoodday inaad keento sabab macquul ah, waxaad si ula kac ah u marin-habaabisay hay'adaha rasmiga ah adigoo u dhiibay xog ama dukumiintiyo been abuur ah, ama qariyay macluumaad muhiim ah (gaar ahaan kuwa la xiriira aqoonsigaaga iyo dhalashadaada), ama waxaad si ula kac ah oo xumaan ku jirto u baabi'isay ama u qarisay dukumiintiyo muhiim ah;
- Waxaad codsiga magangalyada u dhiibatay si aad kaliya dib ugu dhigto, carqaladayso, ama uga hortagto fulinta go'aan laguugu masaafurinayo dalka Talyaaniga;
- Waxaad ka timid dal ay dowladda Talyaaniga ama Midowga Yurub u aqoonsan yihiin inuu yahay waddan ammaan ah oo lagu kalsoonaan karo;
- Waxaa jira sababo sugan oo loo aaminsan yahay inaad khatar ku tahay amniga qaranka ama nidaamka guud ee bulshada, ama hore ayaa dalka lagaaga saaray sababo la xiriira amni-darro ama khalkhalgalin nidaamka guud;
- Waxaad mar kale gudbisay codsi hore loo soo diiday, kaas oo hadda loo arkay mid la aqbali karo in la furo;
- Dalka Talyaaniga waxaad ku soo gashay si sharcidarro ah ama waxaad si sharcidarro ah u joogtay waqti dheeraad ah, adigoo aan lahayn cudurdaar macquul ahna iskuma dhiibin hay'adaha ku shaqada leh ama ma aadan codsan magangalyada caalamiga ah sida ugu dhakhsaha badan;
- Dalka Talyaaniga waxaad ku soo gashay si sharci ah, laakiin sabab macquul ah la'aanteed ma aadan dalban magangalyada caalamiga ah sida ugu dhakhsaha badan; qodobkani ma khuseeyo xaaladaha ay baahida magangalyadu kugu timid adiga oo mar horeba ka maqnaa dalkaagii hooyo ("*sur place*");
- Waxaad ka timid dal celceliska heerka aqoonsiga magangalyada caalamiga ah ee Midowga Yurub – marka la eego xogtii ugu dambaysay ee sannadlaha ahayd ee Eurostat – uu le'eg yahay ama ka hooseeyo 20%; qodobkani ma khuseeyo haddii dalkaaga asalka ah ay ka dhaceen isbeddello waaweyn ama haddii aad ka tirsan tahay dadka qaba baahiyaha gaarka ah ee ilaalinta, iyadoo sidoo kale xisaabta lagu darsanayo farqiga u dhexeeya go'aannada heerka koowaad iyo kuwa kama dambaysta ah.

Xitaa haddii codsigaaga lagu eego hab-raaca degdegga ah, Guddiga Gobolka (Commissione Territoriale) mar walba wuxuu si buuxda u baari doonaa dhammaan baahiyahaaga ilaalinta. Haddii Guddigu u arko in codsigaagu yahay mid adag oo u baahan waqti dheeraad ah, wuxuu badali karaa hab-raaca oo wuxuu

baaritaanka ku sii wadi karaa hab-raaca caadiga ah, kaas oo waqtigiisu intaas ka dheer yahay (lix bilood laga bilaabo maalinta codsiga la qoro, iyadoo dib loo dhigi karo haddii loo baahdo).

Haddii aad qabto baahiyo gaar ah inta dacwadda lagu jiro, Guddiga Gobolka ayaa ku siin doona taageerada ku habboon inta baaritaanka codsigaagu socdo.

Gaar ahaan, arrintan waxay dhici kartaa haddii aad ka tirsan tahay dadka nugul ee xaaladaha gaarka ah ku sugan: sida haddii aad qabto dhibaatooyin xagga caafimaadka jirka ama maskaxda ah, caqabado kaa hor istaagaya inaad si madaxbannaan howlo qabsato iyo/ama aad tahay qof naafanimo leh, ama aad la kulantay jirdil, tacaddi daran oo dhanka maskaxda, jirka, galmada ama tacaddiyada la xiriira jinsiga. Xaaladahan oo kale, haddii Guddiga Gobolku arko inaan lagu siin karin taageerada lagama maarmaanka ah inta lagu jiro hab-raaca degdegga ah, wuxuu go'aansan karaa in dacwaddaada lagu baaro hab-raaca caadiga ah.

Sidaa darteed, haddii aad ku hoos jirto mid ka mid ah qaybaha kor ku xusan, waxaa aad muhiim u ah inaad baahiyahaaga gaarka ah u sheegto hay'adda amniga guud (booliska) ee diiwaangalinaysa codsigaaga, sidoo kalena aad ku caddeyso xaaladahaaga nugul iyo/ama baahiyahaaga gaarka ah foomka rasmiga ah ee internetka laga buuxiyo (online) marka aad codsiga gudbinayso, adigoo ku lifaaqaya wixii dukumiinti ah ee aad haysato oo la xiriira baahiyahaas gaarka ah. Xaaladahaas, Guddiga Gobolku wuxuu go'aan ka gaari karaa in kiiskaaga loo adeegsado hab-raaca caadiga ah, wuxuuna kugu soo wargalin doonaa hab-raaca loo qaatay baaritaankaaga.

Haddii Guddiga Gobolku uu diido codsigaaga magangalyada caalamiga ah adiguna aad u aragto in go'aanka diidmada ahi uu khaldan yahay, waxaad xaq u leedahay inaad racfaan u qaadato Maxkamadda Madaniga ah (Tribunale civile).

Si aad racfaan u qaadato, waxaa lagama maarmaan ah caawinta qareen (looyar), waxaana suurtogal ah inaad hesho gargaar sharci oo lacag la'aan ah oo ay dowladda Talyaanigu bixinayso kharashkiisa (patrocinio a spese dello Stato). Shuruudaha racfaan-qaadashada waxaa lagu sharraxay buug-yaraha ku saabsan hab-raaca caadiga ah ee lagula soo dhiibay lifaaqan.

Hase yeeshee, haddii kiiskaaga loo adeegsaday hab-raaca degdegga ah, waa inaad racfaanka ku gudbisaa muddo 7 maalmood gudahood ah laga bilaabo maalinta aad hesho go'aanka Guddiga Gobolka.

Waxaa intaas dheer, gudbinta racfaanka kaligeed kuma siinayso xaqa aad ku sii joogi karto Talyaaniga. Haddii aad doonayso inaad Talyaaniga sii joogto inta ay dacwaddu ka hor socoto garsooraha, waa inaad racfaankaaga dhexdiisa si cad uga codsataa oggolaanshaha sii joogitaanka dalka.

Garsooruhu wuxuu muddo 10 maalmood gudahood ah ku go'aamin doonaa haddii aad xaq u leedahay inaad dalka sii joogto inta nidaamka dacwadda uu socdo. Waxaa intaas dheer, garsooruhu wuxuu go'aanka kama dambaysta ah ee codsigaaga magangalyada caalamiga ah ku soo saari doonaa muddo 4 bilood gudahood ah.

Wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan dhammaan hab-raaca, waxaad tixraaci kartaa buug-yaraha ku saabsan hab-raaca caadiga ah, ee laguu soo raaciyay lifaaqan.